



---

FARFARS MAMMAS SOFFA av Anna Bengtsson  
KURSIGA FAHDIGA EE HOOYADA AWOOWE ee ay qortay  
Anna Bengtsson

**Geedka qoyska:** Bartmaha Olof iyo Nanny oo iibsaday kursi dhagi ee kijo.

Waxa yaal Cariishka xagaaga kursi fadhi gabooway oo loox laga sameeyey. Waa mid gabooway oo dhamaaday una baahan in la rinjiyeeyo. Waxa jirta xilli uu cusbaa kursigan.

**1915:** Waxa laga joogaa in ka badan boqol sano. Olof ayaa shaqo ka helay xafiiska Banankompaniet\* wuxuuna doonayey inuu guursado Nanny. Waxey u baahdeen kursi fadhi ee kijada, mid laguna fariisan karo laguna seexan karo. Olof aabihii ayaa la joogay oo kursiga fadhi u tijaabiyey. Wuxuu kaloo diyaariyey gaari qaada.

**1918:** Kursiga ayaa shaqo badan qabanayey maadaama dad badani ku fariisanayeen. Axadda waxa u imaan jirey qaraabo. Olof iyo Nanny waxey lahaayeen hal ilmo, magaciisu wuxuu ahaa Henrik. Waxa dhibaato ka taagneyd cuntada. Iswiidhen dibadeeda waxa ka jiray dagaal\* iyadoo doomaha alaabta wada aysan iman karin dekadaha. Ma jirin kafee sax ah iyo bixitaanka bataatiga oo sina aad uu xumaa. Kaabash ayaa aad u badnaa, waxana loo isticmaalayey maraq, ridqid(shiidid) iyo malawax ahaan.

**1921:** Waxey aheyd axad sebteember dhexdeeda ah, Henrik wuxuu jiray afar sano. Dagaalki wuu dhamaaday, waxaa sahal noqday helidda xaabo rajiis ah si aaney dadku u dhaxamoon. Waxey u dabaal degeen in Henrik hooyadii iyo ayeeyadii ay markii ugu horeysay cod bixiyiin, dumarku markaa wixi ka horeeyey ma cod bixin karin.

– Ugu danbeyntii waxan ka qeyb qaadan karnaa go'aan gaaridda, ayey Nanny tiri.

Hadduu Henrik go'aanka gaari lahaa marna ma nadiifiyeen dhegahiisa. Haddii kursiga fadhigu go'aan gaari kari lahaa waxey dhamaan kuraasta fadhiga ee kijada heli lahaayeen dad habeenadi. Kursigan ayaa isaga heystay Henrik. Iyo hal bisad.

**1927:** Maalinta dhalashada ee Henrik toban jirsaday ayaa awoowe u keenay hadiyad fiican – baaskiil! Henrik ayaa haddana heystay sadax walaalo! Waxey u guureen guri weyn, oo gudaha ku leh musqul biyo leh, iyo biyo kulul! Kursiga fadhigu ma dooneyn inuu guuro. Raali kuma aheyn illaa awoowe uu mariyey rinji sidi yaanyada u cas. Wuxuu haddana helay wehel LABA qofood ee habeenadi, mataanaha Inga iyo Gunnar.

**1932:** Dhowr sano kadib wuxuu reerku deggenaa guri ka kooban sadax qol oo ay dekaddu u muuqato halkaasooy doomaha Amerikabåtarna\* ku soo xirtaan. Inga ayaa dooneysey markey weynaato iney noqoto kabtan badmaax, oo ay waliba ka noqoto maraakiibta amerikabåt. Kan ugu yar reerka Olle ayaa doonayey inuu noqdo markab hage maraakiibta si amaana ugu soo hago dekedda. Kursiga fadhiga, oo mar hor leh la rinjiyeeyey guuritaanka cusub kadib, ayaa doonayey inuu isagu noqdo markab amerikabåt oo badda ku socdaalo. Laakin Henrik ayaa ku riyoonayey inuu duuliye noqdo. Wuxuu ahaa 15 sano wuxuuna ekstara ugu shaqeynayey baaskiil ku adeege.

**1939:** Dagaal baa mar kale dunida ka bilowday\*. Waxa la mamnuucay in gaari la wado sababtoo ah waxaan jirin shidaal. Markaa wey wanaagsaneyd in awoowe lahaa geerash baaskiil, waayo dad badan baa u baahnaa in baaskiilada loo hagaajiyo. Gunnar iyo Olle ayaa caawinayey. Walaalka u weyn Henrik wuxuu ku maqna ilaalada xuduudka Iswiidhen, wuxuu bilaabay inuu si saxa diyaarad u duuliyo. Olle ayaa iminka seexaneyn kursiga fadhiga. Mararka qaar wuxuu ku riyoonayey wax cabsi leh oo ku saabsan islaan derisa oo xanaaq badan – balse kursiga fadhiga ayaa si deggen u qarjacleynayey illaa inta uu ka aamusayey.

**1945:** Dagaalka cusub ayaa ugu danbeytii dhamaaday, waxey qaadatay six sano. Waa la dabaal degayey! Henrik ayaa soo noqday kana yimid duulimaadkiisi isagoo wata gabar u alkuman, Margareta! Waxey ku fariisteen kursiga fadhiga. Olle iyo Gunnar ayaa iyaguna dooneyey iney iyada dhinac fariistaan, wey heshiin kari waayeen oo bilaabeen iney murmaan. Nin reer noorweey ah ayaa la deggenaa mudo yar, wuxuu ka soo qaxay naasiistayaasha dalkiisa. Oo halkanna waxa jiray kursi fadhi ee uu ku seexan karay! Kursiga fadhi ayaa ah cidda kaliya ee ogeyd inuu heysto bistoolad.

**1955:** Toban sano kadib Henrik iyo Margareta wey is guursadeen waxeyna dhaleen laba caruura. Gunnar wuxuu noqday dab-demiye yeeshayna xaas iyo caruur. Inga waxey u guurtay Noorweey. Aabbe Olof wuu dhintay iyadoo walaalka yar Olle kaligii ku haray Nanny. Waxey heleen guri ka yar kii hore kana qiima jaban iyadoo kursiga fadhigana mar hor leh la rinjiyeeyey. Mararkey caruurta ayeeyo/awoowe loo yahay booqasho ku yimaadaan oo ku fariistaan kursiga isagoo ciriiri ku ah, in kastuu kursigu isku dayey inuu is balaariyo inti macquula. Dad badan ayaa la qaatay, ayuu ku fekeray. Mararka qaar waxa imanayey dab-demiye Gunnar isagoo markey Nanny ka sii jeesataba afka gashada bataati kaamila, isagoo kala soo baxayey dicsiga. Wuu jeclaa taa.

**1966:** Markey Nanny buuxisay 75 sano waxa yimid qaraabada oo dhan. Gunnar ayaa is weydiiyey sababta aanu Olle uga guurin guriga reerka taasoo keentay iney isku dhacaan oo bilaabaan muran. Waxa lagu casuumay dadka toorto, sharaab aashito leh iyo kafee ee gudaha qolka fiican balse kursiga fadhiga ee kijada looma ogolaan inuu ka qeyb qaato!

Ma tiri lama rabo in la fariisto kijada marka xaflad la leeyahay, ayuu ku fekeray. Cidna iguma daadineyso labeen. Malmalaado iyo gabal rooti ah midna. Wuxuu la qajajac yiri niyad jab.

**1975:** Mudo hore ayaa ugu danbeysay cid ku seexata kursiga fadhiga ee kijada, in kastoo mar hor leh la rinjiyeeyey. Waxaase saarnaa warqado wargeys aad u badan balse la mid maha dadka. Kursiga ayaa maqlayey dhawaaq ka yimaada qolka wanaagsan fiidadki – wuxuu ka imaanayey tiifiiga. Balse markuu Hasse oo ah wiilka Henrik booqasho ku yimaado wuxuu mar kasta doonayey inuu joogo kijada oo ku fariisto kursiga fadhiga. Wuxuu doonayey inuu dhegeysto ayeeyo Nanny sheekadeeda ku saabsan sida aabihii ahaan jiray markuu yaraa, markey musqushooda ku taalay jardiinada oo ay ku meyran jireen weel godan oo yaala kijada. Hasse ayaa iminka isagu lahaa ilma yar, waxuu ku meyrtaa baaf meyrasho.

**1983:** Nanny waxey jirsatay 92 sano. Olle ayaa kaligii deggenaa markey dhimatay. Kuma wanaagsaneyn cunto karinta wuxuuna u baahday qaboojiye iyo firij weyn ee kaartoomadiisa pizza-da iyo cuntada diyaarka aheyd ee qabow.

– Taa ayaa ah in kursiga fadhiga ee kijada la dhigo maqaasiinka dusha, ayuu Olle ku yiri walaalkii ka weyn ee Henrik.

Jooji, ayuu ku fekeray kursiga, igu fariiso uun wax walba wey hagaagayaane! Balse Olle ayaa go'aan gaaray iyadoo Hasse iyo isaga kursiga dusha u qaadeen. Wuxuu kursigu isku dayey inuu culeys iska dhigo inti macquula balse taa ma caawin.

**1983-2002:** Kursiga fadhiga ayaa la dhex dhigay alaab kale oo gabowday. Sidan miyaa ii danbeysey? ayuu ku fekeray. Waa meel aad mugdi u ah, aan la arki karin midabkeyga. Wehel waan leeyahay balse waa wax wada hurda. Sidaan u qiima beelay, ayuu kursigi ku fekeray. Dad baa muda badan igu soo seexday oo igu soo fariistay waligeyna kama caban.

Dhowr sano kadib isaguna si buuxdo ayuu u seexday, sida kuwa kale oo dhan.

**2002:** Maalin baa waxa alaabta hurudda kiciyey talaabo iyo cod ka imanayey dhanka jaran-jarada.

– Halkaa waxa yaala kursiga fadhiga kijida ee gaboobay, ayuu yiri Olle. Waad qaadan kartaa haddaanu liigeyn, wuxuu halkan yaalay labaan sano.

Ma liigayo, ayuu ku fekeray kursiga. Mana qurmin! Waxa la iga sameeyey geedka furu ee keymaha Värmland. Waxan ahaa geed saxa "tal". Hoos baa loo qaaday mar kale, adduun cusub uusan garaneyn. Waxa lagu qaaday gaari u gooni ah!

**Iminka:** Sidaas buu kursiga fadhiga ee kijada ku helay booskiisa ku yaal guriga xagaaga ee Hasse waxana dhici karta in iminka mar kale la rinjiyeeyo.

Waan oгаа in noloshu aanu dhamaan wali, ayuu ku fekeray isaguu faraxsan.

\*Banankompaniet – Shirkadda ugu weyn Iswiidhen ee soo dejisa mooska oo laga asaasay Göteborg taasoo bilowday soo dejinta mooska 1909.

\* Amerikabåtarna – Dooman rakaab ee iswiidhish ah oo ka howl galay isla markaana ka shaqeynayey inta u dhaxeysa Göteborg iyo New York.

\*Dagaal weynihi koowaad ee adduunka (1914-1918) waa dagaal xaruntiisu aheyd Yurub balse ay ka qeyb qaateen qeybo badan oo dunida ah.

\*Dagaal weynihi labaad ee adduunka (1939-1945) Iska hor imaadyo badan oo isugu jira kuwo yar yar iyo kuwo waaweyn oo ka dhacayey meelo kala duwan ee dunida ah kuwaasoo keenay iney dad badani ku dhintaan.